Amniocentesis: Waxa la filan karo ka dib

Ku saabsan Amniocentesis

Waxaad hadda martay amniocentesis. Dheecaanka amniyootigga ayaa ku wareegsan ilmahaaga, wuxuuna leeyahay unugyo iyo walxo kale oo tilmaamo ka bixin kara caafimaadka ilmahaaga. Qaddar yar oo dheecaankan ah ayaa la qaaday, waxaana la baari doonaa sida aad ula soo hadasheen dhakhtarkaaga ama lataliyaha hidde-sideyaasha. Natiijooyinka waa lagula soo xiriiri doonaa sida ugu dhakhsaha badan marka ay diyaar noqdaan.

Maxaa dhacaya baaritaanka ka dib?

- Waxaa laga yaabaa inaad yeelato maroojin fudud ama dhibco dhiig ah oo siilka ka yimaada baaritaanka ka dib. Tani waa inay ku baaba'daa hal maalin gudaheed.
- Waxay u badan tahay inaad guriga aadi karto 15 ilaa 30 daqiiqo ka dib baaritaanka.
- Waa inaad nasato inta ka dhiman maalinta ka dib baaritaankaaga.
- Dhakhtarkaagu wuxuu kaa codsan karaa inaadan samayn jimicsi culus, qaadin wax culus, ama galmo samayn baaritaanka ka dib.
- Waa inaad awooddaa inaad ku noqoto hawlahaaga caadiga ah maalinta xigta, haddii aanu dhakhtarkaagu kuu sheegin inaadan sidaas samayn.

Goorma ayay tahay inaad wacdo gargaar?

La xiriir dhakhtarkaaga ama umulisada hadda ama raadso daryeel caafimaad isla markiiba haddii:

- Aad leedahay calaamado caabuq oo ka jira meesha irbadda laga geliyey. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara
  - Xanuun sii kordhaya, barar, kulayl, ama guduudasho.
  - Xariijimo guduudan oo ka baxaya aaggaas.
  - Malax ka soo baxaysa aaggaas.
  - Qandho ka badan 100.4 darajo Fahrenheit (37 darajo Celsius)
  - Aad xanuun ka dareento calooshaada ama miskaha.
- Aad leedahay dhiig-bax siilka ka yimaada oo ka badan dhibco yar maalinta habraaca.
- Aad leedahay maroojin aan kaa tagayn.
- Aad aragto dheecaan ka imanaya siilkaaga.

Si dhow ula soco isbeddellada caafimaadkaaga, oo hubi inaad la xiriirto dhakhtarkaaga ama umulisada haddii aad wax walaac ah qabto. Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, waa inaad tagtaa qaybta gargaarka degdegga ah ee kuugu dhow.

THE OHIO STATE UNIVERSITY
WEXNER MEDICAL CENTER

Kheyraadkan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin macluumaad oo keliya. La hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan daryeelkaaga. Wixii waxbarasho dheeraad ah, kala xiriir Maktabadda Macluumaadka Caafimaadka (Library for Health Information) 614-293-3707 ama health-info@osu.edu.

© 2026 – 20/07/2026, The Ohio State University Wexner Medical Center

Amniocentesis: What to Expect After

About Amniocentesis

You just had an amniocentesis. Amniotic fluid surrounds your baby and has cells and other substances that can give clues about the health of your baby. A small amount of this fluid was taken out and will be tested as you discussed with your doctor or genetic counselor. You will be contacted with the results as soon as they are available.

What happens after the test?

- You may have mild cramps or vaginal spotting after the test. This should go away within a day.
- You will probably be able to go home 15 to 30 minutes after the test.
- You should take it easy for the rest of the day after your test.
- Your doctor may ask you not to do strenuous exercise, lift anything heavy, or have sex after the test.
- You should be able to return to your normal activities the next day, unless your doctor tells you not to.

When should you call for help?

Contact your doctor or midwife now or seek medical care right away if:

- You have symptoms of infection at the place where the needle went in. These may include
  - Increased pain, swelling, warmth, or redness.
  - Red streaks leading from the area.
  - Pus draining from the area.
  - A fever above 100.4 degrees F (37 degrees C)
  - You have pain in your belly or pelvis.
- You have vaginal bleeding more than just spotting on the day of the procedure.
- You have cramping that does not go away.
- You notice fluid coming from your vagina.

Watch closely for changes in your health, and be sure to contact your doctor or midwife if you have any concerns. If you need immediate medical attention, you should go to the closest emergency department.

THE OHIO STATE UNIVERSITY
WEXNER MEDICAL CENTER

This resource is for informational purposes only. Talk to your healthcare provider if you have any questions about your care. For more education, contact the Library for Health Information at 614-293-3707 or health-info@osu.edu.

© 2026 – July 20, 2026, The Ohio State University Wexner Medical Center